

ICRC DA SOOMAALIYA

Janaayo ilaa Disembar 2016

XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

SUGNAANTA DHAQAALAH



401,000 qof ayaa helay cunto iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qoyska.

Taageerada hab-nololledka ayaa habka gargaarka lacagta cadaanka ah iyo taageero dhanka beeraha ah la siiyey dad kor u dhaafaya **407,000** qof.

SHAQSIYAADKA LAGA QAADAY XORIYADDA



Guud ahaan Soomaaliya, ICRC waxay **50** booqasho ku tagtay meelaha xabsiyada ah. **4,500** maxaabiis ayaa ka faa'idaystay hawlaha la xiriira xabsiyada sida gargaarka caafimaadka, kor u qaadista fayodhawrka iyo dayactirka kaabayaasha.

CAAFIMAADKA



462,000 qof ayaa adeegyo caafimaad ka helay isbitaalada iyo bukaan-socod-eegtooyinka Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) oo ay taageerto ICRC. Waxaa la daaweeyey 31,000 oo nafaqo darro haysay, kuwas oo ku jira 4,600 caruur oo da'dooda gaareyn shan sano oo dhibaatooyin caafimaad ah haayo

DIB-U-SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA



126,000 qof ayaa lagu caawiyey in ay dib -u- dhisaan xiriirka qaraabada. Tani waxaa lagu sameeyey taageerada SRCS oo ay adeegsatay Farriimaha Laanqeyrta Cas (RCM), wicitaano telefoon iyo adeegyada baafinta ayna ku jirto baafinta magacyada 'Dadka Maqan' oo lagu baafiyey bar-naamijka baafinta raadiyaha BBC Soomaali.

BIYAHA IYO DEEGAANKA



Iyadoo loo qodaayo ceelal, ceel gacmeedyo iyo rakibaada meelaha lagu keysado biyaha roobka ayaa **244,000** qof loo hagaajiyey helitaanka biyo la cabo oo ammaan ah.

XEERKA CAALAMIGA EE AADMINIMADA

800 oo saraakiisha ciidamada ah iyo **1,000** qof oo isugu jira hoggaamiyaasha bulshada, saxafiyiin, shaqaalaha iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ayaa fadhiyo waxbarasho lagu wacyi geliyey Xeerka Caalamiga ee Aadminimada iyo iyadoo loo qeybiyey buugag ICRC ay soo daabacday ee xeerka hab-dhaqan dagaal.

